

The logo for the City of Calgary, featuring the word "Calgary" in white on a red rectangular background.

Vehicle for Hire



QODOBKA #003

ISBEDELKA DEGDEGGA AH - Hubinta Liisanka Darawalnimada Tagaasida 2024 Oktoobar 1

Vehicle for Hire Waxay jeclaan lahayd in ay ku ogeysiiso isbeddel muhiim ah oo soo socda oo ku iman doona habka looga helo booliiska xogta lagu hubinayo codsiyada Liisanka Darawalnimada Tagsiga ee cusub iyo codsiyada cusboonaysiinta Liisanka Darawalnimada Tagsiga.

Wakhti xaadirkan, nidaamkayaga gudaha waxaa lagu dhex daray Adeegga Booliiska Calgary si loo fududeeyo hubinaha booliiska. Si kastaba ha ahaatee, Calgary Police Service ayaa ku taliyay, **in laga bilaabo Janaayo 1, 2025**, ay joojin doonaan wada shaqaynta noocan ah. Sidaas darteed, **dhammaan dareewalada tagsiyada** ee codsadyaasha ah waxaa looga baahan doonaa inay **si toos ah uga helaan hubinahooda adeegga booliiska ee magaalada ay deggan yihiin** oo ay u gudbiyaan natiijada xafiiska Vehicle for Hire taasoo qayb ka ah codsigooda cusub ama dib ucusboonaysiinta.

Si loogu diyaar garoobo kala-guurkan, waxaan adeegsan doonaa hab isku-dhafaan illaa Janaayo 1, 2025. Inta lagu jiro wakhtigan, waxaanu sii wadi doonaa inaanu samayno hubinaha booliska iyada oo loo marayo nidaamkayaga hadda, laakiin codsadyaashu waxay sidoo kale haystaan ikhtiyaarka ah inay usoo gudbiyaan hubinta booliska oo sax ah xafiiskaygaha hore. Laga bilaabo Janaayo 1, 2025, dhammaan darawalada doonaya inay codsadaan ama cusboonaysiiyaan liisanka darawalnimada Tagaasida waa inay keenaan hubintooda booliiska xafiiska Vehicle for Hire ay usoo gudbiyaan. Hubinta booliisku waa inay ku taariikhaysnaataa 60 maalmood laga bilaabo taariikhda codsiga.

Faa'iidada isbeddelkan – hadda shakhsiyaadka codsanaya Liisanka Darawalnimada Tagsiga iyo Liisanka Wadayaasha Gaadiidka labadaba waa inay helaan laba hubin oo booliis oo kala duwan. Habka cusub, hal hubinta booliiska ah ayaa loo aqbali doonaa labada codsi, si wakhtiga loogu ilaaliyo codsada loona dhimo kharashyada.

Si aad u codsato hubinaha Booliiska Calgary, fadlan raac link-gan: [calgarypolicechecks](https://calgarypolicechecks.ca)

Haddii aad wax su'aalo ah qabtid, fadlan iimayl u dir vfhlicensing@calgary.ca.

Mahadsanid,

A handwritten signature in blue ink, appearing to read "C. Porter".

Cory Porter

Ku Xigeenka Guddoomiyaha, Vehicle for Hire

Heerarka Gaadiidka Dadweynaha

